# Nidaamka Warbixinta Be@School

**Barnaamijka Farogalinta Maqnaanshaha ee Degmada Hennepin**

| Maqnaansho Bilaa Cudur-daara | Dugsiga | Be@School |
|---|---|---|
| 0 – 6 Cisho<br><br>Xeerarka ugu fiican ee lagu taliyey | Xiriirka dugsiga ee qoyska iyo xalinta dhibaatooinka baahi kastoo ardey wax baranaya iyo caqabadaha xaadiriska.<br><br>Khayraadka waxa lasiiyaa qoyska, fargalinta xaadiriska la hirgaliyey iyo xiriirka joogtada ah ee qoyska.<br><br>* Dugsigu waa inuu u diraa warqad xaadiris 3-cisho ah waalidka(diinta/masuulka(liyiinta) | Be@School shaqaalaha bulshada ayaa u diyaara kalatalinta kiiska.<br><br>Ardeyda leh dhowr sano oo gudbin Be@School ah waxa loola xiriirayaa si mutadawacnimo ah. |
| 7 Cisho | **Warbixinta #1:**<br>Dugsigu wuxuu u dirayaa warbixinta hore Be@School.<br><br>Shaqaalaha dugsiga ayaa sii wadaya inay la shaqeeyaan ardeyda iyo qoyska. | Be@School wuxuu u dirayaa warqad farogalinta oo soo casuumaysa waalidka(diinta)/masuulka(liyiinta) iyo ardeyda (12 iyo ka weyn) si ay fiirsadaan muuqaalka macluumaadka onlaaynka ah.<br><br>Warqadu waxay siinaysaa macluumaad khuseeya barashada sharciga iyo Be@School, iyo sidoo kale khayraadka. |
| 12 Cisho | **Warbixinta #2:**<br>Dugsigu wuxuu u dirayaa warbixinta 2 Be@School, oo ay ku jiraan macluumaadka khuseeya ardeyga, lagu helay ama looga shakiyey caqabadaha, iyo maqnaanshaha.<br><br>Shaqaalaha dugsiga ayaa sii wadaya inay la shaqeeyaan ardeyda iyo qoyska. | Be@School shaqaalaha bulshada ayaa dibu eegaya kiiska.<br><br>Ardeyga iyo waalidka(diinta)/masuulka(liyiinta) waxa lagu casuumi karaa kulan si ay uga doodaan caqabadaha xaadiriska una abuuraan qorshe farogalin oo iskaa ah.<br><br>Haddii ardeygu helo adeegyo kale oo degmada ah, kiiska waxa loo leexin doonaa barnaamijka Degmada Heneppin ee furan.<br><br>Ardeyga iyo qoyska waxa loo gudbin karaa wakaalad lala heshiiyey oo bulsho ama adeegyada degmada. |
| 17 Cisho | **Warbixinta #3:**<br>Dugsigu wuxuu u dirayaa warbixinta 3 Be@School si uu u cusbooneysiiyo xaadiriska, macluumaadka xiriirka, ama walaacyo kale.<br><br>Shaqaalaha dugsiga ayaa sii wadaya inay la shaqeeyaan ardeyda iyo qoyska. | Be@School shaqaalaha bulshada ayaa dibu eegaya kiiska wixii kusoo kordha.<br><br>Ardeyda leh adeegyo joogto ah waxay sii wadayaan inay la shaqeeyaan adeeg bixiyaha degmada ama wakaalada bulshada.<br><br>Ardeyda 5-11 ee aan ka jawaabin dalabka ama diidmada adeegyada mutadawacnimada ah waxa loo dirayaa Ilaalinta Caruurta. |

be.at.school@hennepin.us | Tilifoonka (612) 348-6041 | www.be-at-school.org

Dugsiyadu waxay uga gudbinayaan dhamaan warbixinada Be@School linkiga macluumaadka (BASIL) wabsaaydka.

Hawlgalka The Be@School wuxuu wax ka qabanayaa caqabadaha xaadiriska dugsiga ee ardeyda K-12 ee Degmada Hennepin iyo qoysaskooda iyadoo la maraayo barbaarinta caruurta oo wada-shaqeyn iyo diirad saarid qoys ah.